



**MILWAUKEE
PUBLIC SCHOOLS**



Waalidka ama Mas'ulka ah,

Waxaan u soo qorayna in aad ogaatid sahan ama indhaindhayn dugsiga ilmahaaga isticmaalayo sanadkan. Sahankan waxaa sameeynayan Dugsiyada dadwaynaha ee Milwaukee (MPS) iyo Jaamacada Wisconsin-Milwaukee (UWM). Sahankan waxa uu waydiinayaa ardayda waxyabo ku saabsan waayo-aragnimadooda iyo dareenkooda, sida taageerada ka timaado macalimiinta, sida ay amaan ugu dareemaan dugsiga, shaqadooda dugsiga, iyo qorshooyinka mustaqbalka. Warkaas oo si toos ah looga helo ardayda aad ayeey muhiim ugu tahay horumarinta qorshayaasha lagu hagaajiyo dugsiyada.

Jawaabaha ardayda oo dhan waxa loo hayn doonaa si qarsoodi adag ah. Ardayda na laguma macaabi doono wararka dugsiga ama degmada oo lala xiriiranayo sahanan.

Wixii warbixin ah oo ku saabsan sahanan, fadlan booqo <http://uwm.edu/udisp>, ama la hadal maamulaha dugsiga ilmahaaga.

Fadlan la soco in qodob hoos imanaya xeerka Ilaalinta Xuquuqda Ardayga. 20 U.S.C. Qaybta 1232(c)(1)(A), waxaad xaq u leedahay inaad dib u eegto koobiga su'aalaha la weydiinayo ilmahaaga. Haddii aad jeclaan lahayd in aad sidaas samayso, waxaad ka arki kartaa koobiga sahanan booga <http://uwm.edu/udisp>.

Ilmahaaga kuma qasbano in ay ka qayb qataan sahanan. Haddii aadan rabin in ilmahaagu ka qayb sahanan fadlan u sheeg dugsiga ilmahaaga.

Mahadsanid!

